

KUSOO DALXIIS BANAANKA

Ayadoo kaashanaysa REI, waaxda Jardiiinooyinka iyo Nasiinada Bloomington waxay kuusoo bandhigaysaa saddex fursadood oo xiiso leh si aad xog uga hesho qaabka banaanka loogu soo dalxiiso.



Dhammaan munaasabaduhu waa bilaash wax diiwaan gelin ahna lagaama rabo. Waxaa la iskuugu imaanayaa Bush Lake Beach House, 9140 East Bush Lake Road.

Qariirada iyo Jihooyinka Goobta

Nufeembar 15 iyo 22, 10 barqanimo – 12 duhurnimo

Inta lagu jiro xiisadaan, tababarayaal khibrad leh oo ka socda REI ayaa kaa caawin doona inaad fahanto xogta ku qoran qariirada, adeegsiga saxda ah ee jiheeyaha, iyo sida labada aaladood la isku waafajiyo. Ka qaybgalayaasha ayaa sidoo kale baran doona mabaadii'da aasaasiga u ah sida jiheeyada magneetiga ah ee waaqooyi u jeeda, waqooyiga runta ah iyo kala saarida magneet loo adeegsado.

Tirada ka qaybgalayaashu waxay ku kooban yihiin 20 qof.



Xirfadaha Ku badbaadida Kaymaha ee Qoysaska

Nufeembar 15 iyo 22, 1 duhurnimo – 3 galabnimo

Koorsadaan tababarka tooska loo jilaayo ee ku badbaadida kaymaha ayaa baraysa qoysaska sida looga hortago caqabadaha ka dhasha ku dalxiisida banaanka. Nashaadaadka waxaa ku jira shidida dabka kaamka ee ugu fiican iyo dhisida hooy degdeg ah oo ay la socdaan tilmaamo iyo xeelado kale oo ku aadan sida loo xaliyo cilad kasta oo kaaga timaada bii'ada dabiiciga ah.

Tirada ka qaybgalayaashu waxay ku kooban yihiin 20 qof.



Baro sida loogu socdo Barafka

Nufeembar 29 iyo Diseembar 6, xiisado 50 daqiiqo soconaaya oo bilaabanaaya 10 barqanimo, 11 barqanimo, 12 duhurnimo, iyo 1 duhurnimo.

Dalxiiskan barafka lagu soconaayo, waxaad baran doontaa sida loo aqoonsado ciladaha guud ee ka dhasha cimilada jiilaalka, sida loo fuulo iyo sida looga dagto taagaga, iyo tilmaamaha iyo xeeladaha ka dhigaaya dalxiis kasta oo xiliga jiilaalka loo baxo mid ammaan ah oo raaxo leh!

Xiisadaha ayaa biloowda saacad kasta xiligii loogu talagalay. Qalab ayaa lagu siinayaa. 12 Qof ayaa ka qaybgeli karta xiisadiiba.



Providing Leisure Activities for Youth

Barnaamijyadaan banaanka waxay qayb ka yihiin mashruuca P.L.A.Y. waxaana lagu fulinayaa qaab waafaqsan cimilada jirta dadkuna kala fogaanayaan lana raacaayo xeerarka kale ee faya dhawrka. Wixii xog dheeraad ah, booqo blm.mn/project-play.

Ma qabtaa su'aalo ama ma u baahan tahay su'aalo dheeraad ah?

La xariir Bloomington Parks and Recreation ood ka wacayso 952-563-8877 ama parksrec@bloomingtonmn.gov